

Siyaasadda JICDE- Ka Hortaga Xoog-sheegadka iyo Waxbarashada

Hawlgalka Dugsiyada Dadweynaha Denver, xarunta waxbarashada ee beesha, waa in uu ballan qaado in carruurteenna iyo dhallaankeenna ay hellaan aqoon, xirfado iyo qiimo si ay u noqdaan muwaadiniin isku-filan iyo waxbarteyaal waara. Waxaan ka guulgaari karnaa hawlgalkan anagoo ku siinayna khibrad aqooneed qofka gaar ah jawi badbaadsan, sahlaya waxbarasho oo lahayn arbushaadda aan loobaahnayn.

Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay taageeraan jawi dugsi badbaadsan, sahlaya waxbarista iyo waxbarashada ee jawi aan lahayn handadaad, dhibaatayn iyo nooc kastoo ah dhaqan xoog-sheegad. Guddiga Waxbarashada wuxuu ansixinayaa siyaasaddan si ay kor ugu qaadaan joogtaynta habka iyo si uu caawimaad ugu geysto abuuridda jawi xoog-sheegashadka nooc kasta ah loogu qaddariyo wax aan la aqbali Karin.

QEEXITAANKA: Xoog-sheegadka waxaa loo qeexaa "sida oraaah kastoo qoran ama hadal ah, ama waxqabad jir ahaaneed ama ra'yiga iyo dareenka la muujiyo, ama tasmada lagu daydo oo ay sababtaasi ka dhalatay, ee loogu talagalay in loogu geysto dhibaato hal ama arday badan ee jooga dugsiya gudahiisa, dhulka dugsiya, saaran gawaarida dugsiya, jooga boosteejada cayiman ee baska dugsiya, ama waxqabadyada dugsiya ama dhacdooyinka la oggolaadey." CRS 22-32-109.1 (2)(a)(X)

CAWAAQIBTA: Ardayga ku lug yeesha ficil kastoo xoog-sheegad ah wuxuu ku khasban yahay talaabada anshax marinta ku habboon ayadoo la eegayo Siyaasadda Degmada JK iyo JK-R ee la xiriirta habraacyada anshaxa waxaana ka mid noqon kara dugsi ka joojin, dugsi ka cayrin iyo/ama u dirista maamulka sharci fulinta. Darnaanshaha iyo nidaamka, haddii mid uu jiro, ee xoog-sheegashada waa in la tixgeliyo marka go'aanada anshax marinta la gaarayo.

Kormeeraha guud ee dugsiyada waa in uu sameeyo barnaamij dhammeystiran oo wax looga qabanayo xoog-sheegashada dhammaan heerarka fasalada. Barnaamijka waa in la jiheeyo si loogu guulaysto yoolalkan soosocda:

1. In loo diro fariin waadax ah ardayda, shaqaalaha, waalidiinta iyo xubnaha beesha in xoog-sheegashada aanan loo dulqaadan doonin.
2. In la hirgaliyo habraacyada loogu talagalay waxqabadka degdega ah, baaritaan, iyo in la waajiho ardayda ku lugta leh dhaqanka xoog-sheegadka.
3. In la bilaabo barnaamijyo lagu badelayo dhaqanka ardayda ku lugta leh dhaqanada xoog-sheegadka ayadoo loo marayo dib-u baridda habdhaqanka la aqbali karo, munaaqasho, la talin iyo cawaaqibta taban ee ku habboon.
4. In la sameeyo lana dhiirigeliyo iskaashiga miradhalka leh ee lala yeelanayo waalidiinta iyo xubnaha beesha si ay caawimaad uga geystaan sii-wadidda jawi aan lahayn xoog-sheegad.
5. In lagu taageero dhibaneyaasha xoog-sheegadka hab la talin shaqsi ahaaneed ama asaagaa ahaan.
6. In la aqoonsado lana ammaano habdhaqanada togan, caawimaadda leh ee ay ardayda ugu wajahayaan midba midka kale sida aasaaska joogtada ah. La Ansaxiyay:

TIXRAACYADA SHARCIGA.: C.R.S. 22-32-109.1(2)(a)(X)

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JK, Habdhaqanka iyo Anshaxa Ardayga

La Ansaxiyay: 15 Nofeembar, 2001

La Muraajaceeyay: 15 Oktoobar, 2009

TIXRAACYADA SHARCIGA.: C.R.S. 22-32-109.1(2)(a)(X)

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JK, Habdhaqanka iyo Anshaxa Ardayga